



# Kaydso Rasiidada Kharashaadka Waxbarasheed ee Carruurtaada

Haddii aad iibsantay qalab dugsiyeedka carruurtaada ee ku jirta Xanaanadda Carruurta ilaa fasalka 12-aad, waxaad u qalmi kartaa barnaamijyadan canshuur dhaafka ah:

- Ka-jarista Waxbarashada K-12
- Canshuur dhimista Waxbarashada K-12

Kaydso rasiidadaada! Labada barnaamijba waxay kaa caawin karaan inay canshuurtaada hoos u dhigaan waxayna kordhin lacagta kuu soo noqon doonto markaad buuxineyso canshuurta dakhliga ee Minnesota.



## Kharashaadka Caamka Ah ee U Qalma:

- Qalabka dugsiya (qalin, warqad, xisaabiyaha)
- Qalabka waxbarashada ee kumbuyuutarada iyo kuwa lagu shubtaba kumbuyuutarada
- Barista manhajka K-12 ee macallin aqoon u leh
- Kirada ama iibka qalabka muusikada ee lagu isticmaalo dugsiya



## Kharashaadka Aan u Qalmin:

- Qalabka dugsiya ee aan waxbarashada loo isticmaalin (boorsooyinka, tishuga, galalka)
- Dharka, oo ay ku jiraan dharka dugsiya (marka laga reebo dharka jimicsiga ee loo baahan yahay)
- Qadada dugsiya
- Safarka goyska ee matxafka ama goobaha xayawaanka (suuga)



## Ma u qalmaa?

Si aad ugu qalanto dib ucelin canshuurta ama ka dhimis, labadan qodoba waa inay labaduba khuseeyaan:

- Waxaad iibsantay adeegyo waxbarasho ama qalab si aad uga caawiso waxbarashada carruurtaada
- Carruurtaadu waxay dhigtaan fasalka barbaarinta ilaa fasalka 12-aad ee dugsi dadweyne, gaar loo leeyahay, ama guriga

## Xaddidaadaha Dakhliga ee Barnaamij kasta:

**Canshuur celinta Waxbarashada K-12:** Dakhligaaga guud ee la hagaajiyay waa inuu ka hooseeyaa heerarka halkan lagu muujiyay. Haddii aad u qalanto lacag celinta, waa inaad soo gudbisaa canshuur celinta Minnesota si aad u dalbato soo celinta.

| Tirada carruurta u qalanta ee ku jirta K-12: | Dakhliga goysku waa inuu ka yaryahay:                    |
|--|--|
| 1 ama 2                                      | \$79,760   |
| 3  | \$82,760   |
| In ka badan 3                                | \$85,760 oo lagu daray \$3,000 ilmo walba oo dheeraad ah |

Ka-jarista Waxbarashada K-12: Ma jiraan xaddidaad dakhli oo loogu talagalay ka-jarista waxbarashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyadan iyo macluumaad kale oo muhiim ah oo canshuurta ah, booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo gal sanduuqa Raadinta ee K12 ama naga soo wac 651-296-3781 ama 800-652-9094.